**Sharci 26 Nofember 1957, lamba. 16.**

**Canshuurta dhismooyinka aan dhagaxa ahayn oo ayna saarreyn canshuurta dakhliga.**

## MAAMULAHA

Marka uu xaqiiqsaday ansixinta Golaha xeer-dejinta

## WUXUU GUDDOOMINAYAA:

Sharciga soo socda:

### Qod. 1

Laga bilaabo 1da Jannaayo 1958,milkiilayaasha cariishyada, mudullooyinka iyo dhismooyinka kale oo aan joogtada ahayn; oo aan ahayn kuwo dhagax ku dhisan ama aan ahayn , si kastaba, kuwa ay ku waajibto canshuurta dakhliga, waa laga doonayaa in ay bixiyaan. qaddarka iyo qaabka ay jideeyeen qodobbada soo socda, xagga dhisme ksta oo loogu talagalay degaan iyo xaggaqayb kasta oo loogu talagalay isticmaal ganacsi, wershad, farshaxan ama addeeg dadweynw.

### Qod. 2

Xagga dhisme kasta oo loogu talagalay degaan, qaddarka canshuurta waa:

— Sh. So. 15, xagga kuwa ku yaal gudaha (ka jira) xaydaanka baraha xarumaha Dowladaha Hoose;
— Sh.So. 7,50 xagga kuwa ku yaal goobaha (meelaha) kale;

Xagga qayb kasta oo loogu talagalay isticmaal ganacsi, wershadeed, iyo farshaxan, amaba adeeg dadweyne qaddarka canshuurta waa:

— Sh. So. 20 kuwa ku yaal gudaha deegaanka xarumaha Dowladaha hoose;
— Sh. So. 10 xagga ku yaal (ka jira) meelaha kale.

### Qod. 3

Saamiyada (qoondooyinka) kali-kalida ah oo uu gooyey Qod. 2aad, waxa uu ku jiraa albeg casnuureed 10% ah oo loogu eexinayo Dowladaha hoose sida kala leeyihiin.

### Qod. 4

Dhisme kasta waa in lagu qoro magaca milkiiaha diiwaan lagu haynayo Degmo kasta:

Diiwaanka waa in ay ku jiraan:

— Tilmaamaha milkiilaha;
— Tilmaamaha dhismaha;
— Tirade qolalka;
— Isticmaalka loogu talagala dhisme kasta iyo qol kasta;
— Dhammaan wixii tilmaamo ah ee loo baahan yahay.

### Qod. 5

Laga bilaabo 1 Jennaayo ilaa 28 febaraayo, ee sanad kasta, kaalinta canshuur-bixiyeyaasha oo uu weliyo xusuu-qorka Laga soo dheehdo diiwaannada, waa in lagu dhejiyo boorka Xafiiska Degmada, iyo dowladaha Hoose oo ikhtisaaska iyo awoodda u leh ama la dhigo madaxda Tuulada, xagga in canshuur-bixiyeyaasha la tuso, hal nuqul oo ka mida kaalin kasta waa in loo diraa Wasaaradda Arrimaha Maaliyadda.

**Qod. 6**

Cabashooyinka lidka u ah jagada ku-qorista waa in loo geeyo Guddoomiyada Degmadaas,, ayada oo haddii kale dhicid u halis ah, inta lagu gudajiro 31 maarso, góaanna laga gaaro 30 abiriil gudaheeda, ee sanad kasta.
Góaanka Guddoomiyaha Degmada waxaa ka furan in cabasho looga qaato guddoomiyaha Gobolka.

**Qod. 7**

Canshuurta waxa ay waajibtaa sanad-qorraxeed kasta, waxa ay noqoneysaa mid bislaatay oo la qaadi karaa 1[da] Maajo, ee sanadka ay ku asyeysan tahay, waana in lagu bixiyo Xafiisyada Degmada ama loo dhiibo dadka u xilsaaran qaadideeda oo wakaalad ka haysta Guddoomiyaha Degmada, 30[ka] Sebtember gudaheeda, ee isla sanadkaas qudhiisa.

Dadka u xilsaaran ururinta canshuurta waxa ay ruqsad u qabaan, in ay gudanayaan xilkooda (waajibaadkooda) in ay taxqiiq iyo hubin ku sameeyaan dhismooyinka, xagga saxnimada ku qorista dhismo ama qol kasta diiwaanka ku xusan Qod. 4aad.

**Qod. 8**

Cashuur-bixiyeyaasha canshuurta la soo daahay oo aan canshuurta ku bixin mudda ku xusan Qod. 7aad gudaheeda, Guddoomiyaha Degmada waxa uu digniin ka bixinayaa, asaga oo ogeysiis qoraal ku bixinayo kaas oo ku cad yihiin magaca deysanaha, tirada deynta iyo muddo aan ka yarayn 15 maalmood.

Haddii muddadaas tirtirsiinta bixinta deynta la dhaafo, ayada oo aan laga faaiideysan, Guddoomiyaha Degmada waxa uu amrayaa xajsinta hantida guurtada ah, ee deynsaha, waxa uuna goynayaa taariikhda iibka naadada ah, ee ka dhaca meel fagaare ah, muddo aan ka yarayn 15 maalmood gudahood oo ka bilowda taariikhda xajsinta (qabashada).

**Qod. 9**

Canshuurbixiyuhu waxaa uu góaanka xajsinta cabasho ugu qaadan karaa Garsooraha Maxkamadda Gobolka, 15 maalmood gudahooda, laga bilaabo taariikhda ogeysiiska góaanka isla xajsintaas.

Cabashada waa in la soo bandhigo, ayada oo la marinayo Guddoomiyaha Degmada.

Tallaabo kasta oo lga qaadayo canshuur-biyaha waa la joojiyey ilaa inta garsooruhu uusan góaan ka kaarindulucda cabashada.

**Qod. 10**

Saboolnimo la caddeeyey darted, bixinta canshuurta waa loo dhaafi karaa sanadba sanad, qayb ahaan ama gebi ahaan, canshuur-bixiyeyaasha aan run ahaantii awoodin iyo bi-shardi in dhismaha (guriga) canshuurta saaran tahay uu yahay mid uu deggan yahay milkiilaha saboolka ah.Saldhigga saboolnimada waa in milkiiluhu yahay aan awoodi karin in uu shaqayo.

Canshuur ka-dhafidda waa mid uu bixinayo Wasiirka Arrimaha Maaliyadda, ayada oo lagu saleynayo soo-jeedinta sababeysan, ee Guddoomiyaha Degmada, eedegaanka. Soojeedinta canshuu-dhaafidda waa in ay soo gaarto wasiirka, ayada oo ay wehliyaan jagooyinka ku xusan Qod. 5aad, ee hore.

**Qod. 11**

Wasiirka Arrimaha Maaliyadda waxa uu u idman yahay in uu soo saaroxeerar lagu fulinayo Sharcigan.

### Qod. 12

Waxaa la baabíiyey:

- Bayaanka 17 nofember 1944, lamba. 14, ee ku saabsan canshuuraha saaran dhismooyinka (guryaha) ka jira Soomaaliya;
- Xagga maadada uu tixraacayo sharcigan, amar-gooyada 11 Luulyo 1955, lamba. 14 " xeerarka xagga soo uruurinta khasabka ah, ee canshuuraha saaran (ku waajiba) dhismooyinka (guryaha) iyo beeraha".

### Qod. 13

Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa faafinta Rasmiga. Qof kasta waxa khasab ku ah in uu dhowro una kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Muqdisho, 26 Nofember 1957.

P. Maamulaha

**P. Franca**

**Cabdullahi Issa Salaad abdi Maxamuud**